## SUURAT AL-QADR:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Annagaa soo dajinnay Quraanka Habeenka LaylatulQadarka ah ( sharafta leh )*

2. *Ma taqaanna LaylatulQadarka*

3. *Waa Habeen ka khayr badan kun bilood ( oo kale )*

4. *Waxaana soo daga Malaa'igta ( kale ) iyo Malaku Jibriil habeenkaas idinka Eebe dartiis iyo amarkiisa*

5. *Waana Habeen nabadgalyo inta waagu ka baryi*

Qur'ank 97: 1-5

***Sharaxa Suuradaan:***

Wuxuu Eebe inoogu sheegay Suuraddan inuu Quraanka sharafta leh soo dajiyay Habeen ka wanaagsan ee ka khayr badan kun bilood, waxaana la sheegay in Habeenkaasi ku jiro bisha barakaysan ee Ramadaan. Saas daraaded mar hadduu yahay habeen sharaf leh Malaa'igtuna soo dagi Habeen nabadgalyana yahay, waa in lagu dadaalaa sidii loo heli lahaa wanaaggana la baddiyo xumaantana laga fogaado.

Abu Hurayra waxaa laga wariyay in Rasuulkii Eebe " Nabadgalyo iyo Naxariis Korkiisa Eebe ha yeelee" inuu yidhi: Ruuxii istaaga Laylatul Qadarka ( Salaad ) rumayn iyo ajri doonid darteed waa loo dhaafaa wixii hormary oo dambigiisa ah "

Waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim